

# Baaritaan iyo Qiimeyn

## Kala duwanaanta Baaritaan (Screening) iyo Qiimeyn (Evaluation)

Sharciga gobolka Minnesota wuxuu farayaa in dugsiyada dadweynaha ay baaritaan ku sameeyaan dhammaan carruurta aan wax akhrin karin heerka fasalkooda si loo ogaado astaamaha dyslexia. Baaritaankani ma aha baaritaan caafimaad (diagnosis). Ujeeddadiisu waa in lagu aqoonsado ardayda laga yaabo inay qabaan dyslexia. Waxaa samayn kara macallimiin ama shaqaalaha dugsiyada. Si loo ogaado baaxadda iyo darnaanta dhibaataada akhriska ilmaha, waxaa loo baahan yahay qiimeyn dhamaystiran. Qiimeynta dugsiyada ma sheegto dyslexia maadaama ay tahay baaritaan caafimaad; beddelkeeda, ardayga waxaa lagu dari karaa qayb naafonimo sida Naafonimada Waxbarashada Gaarka ah (Specific Learning Disability – SLD). Carruurta qaba dyslexia waa lagu dari karaa haddii ay buuxiyaan shuruudaha SLD.

## Qiimeynta Dugsiga iyo Qiimeynta Gaarka ah

Qiimeynta dugsiyada waxay diiradda saartaa go'aaminta in ardaygu u qalmo Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah (IEP) iyadoo lagu salaynayo sharciga IDEA. Badanaa dugsiyadu ma haystaan khabaro sameeya baaritaan caafimaad oo dyslexia ah. Qiimeyn gaar ah oo uu sameeyo khabiir maskaxda (neuropsychologist) ayaa la heli karaa si loo bixiyo diagnosis rasmi ah. Ogaanshaha dyslexia wuu ka duwan yahay u-qalmitaanka IEP. Dugsiyadu way tixgelin karaan ama way iska indho tiri karaan qiimeynta gaarka ah.

## Qaybaha Lagu Qiimeeyo Dyslexia

**DHAMMAAN** qodobadan hoose waa in la tijaabiyaa:

- Habka dhawaaqyada (Phonological Processing)
- Magac-bixinta Degdegga ah (Rapid Automatic Naming)
- Akhriska Afka
- Xawaaraha hab-socodka maskaxda
- Dib-u-eegista diiwaannada dugsiyada
- Akhrinta ereyo aan macno lahayn
- Dib-u-eegista dhamaystiran oo taariikhda qoyska iyo tan dugsiyada ah
- Higgsaad
- Eray-bixin
- Tusaale qoraal
- Xirfadaha xisaabta
- Garaadka
- Akhrinta hal eray
- Fahamka Akhriska

## Haddii Ilmahaygu Uusan u Qalmin IEP ama Qorshaha 504 Maxaa Dhacaya?

Haddii ardaygu uusan buuxin shuruudaha waxbarashada gaarka ah ama Qorshaha 504, sharciga Minnesota wuxuu farayaa in dugsiyada bixiyo faragelin akhris si loo dardar geliyo horumarka ardayga loona gaarsiyo heerka fasalkiisa. Haddii ardaygu uusan gaadhin heerka akhriska dhamaadka sanad dugsiyeedka, dugsiyada waa inuu sii wadaa faragelinta ilaa uu ardaygu gaaro heerka loo baahan yahay. Sharcigu sidoo kale wuxuu tilmaamayaa in arday lagu aqoonsaday inuusan wax akhrin karin heerka fasalka lagu siiyo waxbarid gaar ah oo ah mid dareen-badan, nidaamsan, taxane ah, isdaba-joog ah, isla markaana si cad loo fahmi karo.

---

**Wixii macluumaad dheeraad ah booqo <https://www.decodingdyslexiamn.org/diagnosis>**

Macluumaadka la bixiyay maaha, oo aan loogu talagalay, ka dhigan talo sharci. Dhammaan macluumaadka, waxa ku jira, iyo agabka, oo ay ku jiraan cid saddexaad, ayaa loogu talagalay ujeedooyin macluumaad guud oo keliya. Waa inaad la xiriiirtaa qareenkaaga si aad talo uga hesho arrin kasta oo sharci ah.

